

# OGOW XUQUUQDAADA

**VOTE**  
I WILL VOTE  
**2016**

Maadaama aad tahay codeeye ah reer Minnesota, waxaad leedahay xuquuq badan—ogow xuquuqdaadu waxa ay tahay!

## **IN AAD SHAQADA FASAX KA QAADATID SI AAD U CODAYSID**

Waxaad xaq u leedahay in aad fasax shaqada ka qaadatid adiga oo aan lagaa goynayn lacag, fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.

## **IN AAD CODAYSID HADDII AAD SAFKA KU JIRTID 8DA FIIDNIMO.**

Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid haddii aad safka ku jirtid waqti kasta oo ka horeeya 8da fiidnimo.

## **IN AAD ISDIIWAANGELISID MAALINTA DOORASHADA**

Waxaad xaq u leedahay in Maalinta Doorashada aad isdiiwaangelisid si aad u codaysid haddii aad muujin kartid caddaynta loo baahan yahay ee deegaanka.

## **IN AAD HADAL KU SAXIIXDID**

Waxaad xaq u leedahay in aad hadal ku caddaysid qofka aad tahay oo aad qof kale waydiisato in uu adiga kuu saxiixo haddii magacaaga aadan wax ku saxiixi karin.

## **IN AAD CAAWIMAAD WAYDIISATID**

Waxaad xaq u leedahay in aad qof kasta caawimaad waydiisatid, marka laga reebo qof wakiil u ah looshaqeeyahaaga ama urur, ama musharax.

## **IN AAD GOOBTA CODBIXINTA CARUUR KEENI KARTID**

Waxaad xaq u leedahay in aad caruurtaada keento si ay kuula codeeyaan.

### **TAARIIKHHAHA 2016**

**DOORASHADA AASAASIGA**  
Talaada, 9ka Bisha 8aad (August)

**MAQNAANSO KU CODAY**  
Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qof ahaan imanaya  
23ka Bisha 9aad (September) ilaa  
7da Bisha 11aad (November).

**ISDIIWAANGELI SI AAD U  
CODAYSO**  
Hory isudiiwaangeli ugu dambayn  
18ka Bisha 10aad (October)  
si aad waqti u hesho Maalinta  
Doorashada.

**MAALINTA DOORASHADA**  
Talaada, 8da Bisha 11aad  
(November)

*waa socotaa eeg bogga gadaale...*

**Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota**  
**[mnvotes.org](http://mnvotes.org) • 1-877-600-VOTE**

# OGOW XUQUUQDAADA

**VOTE**  
2016

...ka timid horay

## **IN AAD CODAYSID KA DIB MARKAAD DHAMMAYSATO XUKUN DEMBI CULUS**

Waad codayn kartaa ka dib markaad dhammaysato dhammaan qaybaha xukunkaaga, oo ay ka mid yihiin tijaabo dembiile, siidayn waqtigii oo aan la gaarin, ama shuruudo kale sida magdhaw.

## **IN AAD CODAYSID HADDII AAD WALI KAA MAS'UUL AH HOOS JOOGTID**

Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid haddii aad wali kaa mas'uul ah hoos joogtid, haddii aan garsoore kaala noqon xaqqa aad u leedahay codbixinta.

## **IN AAD CODAYSID ADIGA OO AAN CODKAAGA CIDI SAAMAYN KU YEELAN**

Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid adiga oo aan cid joogta goobta codayntu wax saamayn ah ku yeelan codkaaga.

## **IN LAGUU BEDDELO WARQADDA CODBIXINTA**

Waxaad xaq u leedahay in lagu beddelo warqadda codbixinta haddii aad qalad ku samaysay warqadda codbixinta in taadan sanduukha ku ridin.

## **IN AAD CABASHO GUDBISO**

Waxaad xaq u leedahay in aad cabasho qoraal ah u gudbiso goobtaada codbixinta haddii aadan ku faraxsanayn qaabka doorashada loo maamulayo.

## **IN AAD WADATID TUSAALE AH WARQADDA DOORASHADA**

Waxaad xaq u leedahay in aad tusaale ah warqadda codbixinta la gashid waabta codbixinta.

## **IN AAD WADATID XEERKA XUQUUQDA CODBIXIYAHA**

Waxaad xaq u leedahay in aad nuqul ah Xeerka Xuquuqda Codbixiyaha la gashid waabta codbixinta.

*Xafiska Xoghayaha Gobolka Minnesota*

*[mnvotes.org](http://mnvotes.org) • 1-877-600-VOTE*

Bisha 3aad (March) 2016